

## Macmiisha wanaagsan,

Cudurka coronavirus dartiisa xafiiska wuxuu u furanyahay kaliya qofka isu diwaangalinaya shaqo raadin oo aan isagu awoodin in uu khadka ama warqad ahaan isu diwaangaliyo. Xafiiska gudahiisa waxaa loo oggolyahay islamarkiiba toban qof oo kaliya inay soo galaan. Kombiyuterada xafiiska gudahiisa yaalla ma shaqaynayaan.

Ugu horayn, isku diiwaangeli qadka internetka ah ee oma-asiointipalvelu <https://asiointi.mol.fi/omaasiointi/?kieli=fi> Hadaadan haysan kaararka ama macluumaadka aqoonsiga bangiga oo aanad online isticmaali karin, waxaad ku buuxin kartaa foomka dalabka shaqada elektiroonigga ah ee websaydhka <https://asiointipalvelu.ahp.fi/public/1/fill>

Haddii aadan awoodin inaad isu diiwaangeliso websayd ahaan, foomka diiwaangelinta waxaad ka soo qaadan kartaa xafiiska shaqada albaabkiisa. Halkan waxaad ka hubin kartaa saacadaha xafiiska uu furanyahay <http://toimistot.te-palvelut.fi/uusimaa/yhteystiedot> Warqadda u buuxi si taxaddir leh, kuna soo dir boostada ama ku soo rid sanduuqa boostada xafiiska shaqada banaankiisa yaala. Xafiiska shaqada ayaa dib u bilaabi doona shaqo raadintaada laga bilaabo maalinta aad codsatid foomka diiwaangelinta. In aad u diwaangashan tahay shaqoraadin waxay kaaga bilaabmaysaa maalinta aad qaadatay foomka diwaangelinta (taariikhda waxay ku qorantahay foomka).

Wixii kale ee macluumaad ahna waxaad ku reebi kartaa isla sanduuqa ama boostada ayaad kusoo diri kartaa.

Wixii intaa ka badan oo dhan waxaad ku xallisaa khadka internetka, taleefan ama email.

Haddii aad leedahay calaamadaha hargabka ama aad safar dibadda ah tagtay labadii usbuuc ee u dambeeyay oo aanad foomka is diwaangelinta aanad kaligaa buuxin karin waxaad soo wacdaa taleefan namberka xafiiska. Fadlan, waqtigaas xafiiska gudahiisa ha soo galin.

### **Henkilöasiakkaiden valtakunnallinen puhelinpalvelu:**

p. 0295 025 500 (arkisin klo 9.00-16.15)

### **Yritysassiakkaiden puhelinpalvelu:**

p. 0295 040 002 (arkisin klo 9.00-16.15)

**Sähköposti:** [kirjaamo.uusimaa@te-toimisto.fi](mailto:kirjaamo.uusimaa@te-toimisto.fi)

**Postiosoite:** Uudenmaan TE-toimisto kirjaamo, PL 1003, 00521 Helsinki

Yhteistyöterveisin,

Uudenmaan TE-toimisto